

RESTAURANT REVITALIZATION FUND

Grants to support restaurants and workers

DEEQDA GARGAARKA MAQAAYADDAI Deeqaha lagu taageero maqaayadaha & shaqaalaha maqaayahadaha

Xafiiska Kobcinta Dhaqaalaha, oo la kaashanaya Xafiiska Horumarinta Shaqaalaha ayaa bilaabay Barnaamijka Dib-u-noolaynta Maqaayadda (Restaurant Revitalization Program) (RRP), barnaamij tijaabo ah oo 3 bilood ah si maqaayaddaha uu ugu fidiyo deeq ay aad ugu baahan yihiin jiritaankooda inta ay ka soo kabanayaan COVID-19.

Faahfaahinta Barnaamijka:

- Sanduuqani wuxuu taageeri doonaa maqaayadaha ku dhex yaal Magaalada Boston
- Ganacsiyada ayaa heli doona **\$5,000** si ay isaga bixiyaan kharash kasta oo la xiriira ganacsiga (lacagtan looma baahna inay ku xirnaato kiro ama mushahar)
- Deeqdan ayaa sidoo kale fidin doonta lacag shaqaalaha cusub/kuwa horey u shaqaynayay lagu joojinayo inta lagu jiro muddada tijaabada ah ee 3 bilood ah wadar ahaan \$900 shaqaalihiiba iyo 100 B-Local Bilkasta, gabagabada tijaabada saddexda bilood ah (\$300 @ 3 bilood = \$900)
- Marka la gaaro dhamaadka muddada saddexda bilood, shaqaalaha waxay xaq u yeelan doonaan lacag deeq waxbarasho oo bilaash ah oo ay isaga bixin karaan shahaadada Associate-ka ee BHCC, RCC, ama BFIT, iyagoo ku celcelinaya hindisaha Duqa-Magaalada ee Kulliyadda Community College Bilaashka ah ama barnaamijka tababbarka xirfadaha shaqada oo iskaashi jira OWD la leh.
- Maqaayadaha u shaqeeya shaqaalaha baqshiishka ku shaqeeya (tipped) waxay xaq u leeyihiin inay helaan **\$15,000** oo dheeraad ah lacag haddii iyagu:
 - Ay bixiyaan Mid Mushahar oo Caddaalad ah (\$12.75 saacaddiiba) oo ay siiyan shaqaalaha baqshiiska ku shaqeeya bashiiba.
 - Ay dhammeeyaan barnaamijka Tababbarka iyo Qalabka iyo Tababbarka Kushiinka ee High Road inta lagu jiro sagaal bilood laga bilaabo marka ay deeqda lacagta ay helaan
 - Dhammaystiraan sahaminta ama Rayi-ururinta City of Boston
 - Wadaagto qorsho qoraal ah ee loogu talagalay in lagu helo sinnaanta mushahar buuxa inay helaan shaqaalaha baqshiiska ku shaqeeya iyo kuwa kale muddo shan sano gudahood (kama dambays bisha Agoosto 2026).

CITY of **BOSTON**

B local
EARN POINTS. SUPPORT BUSINESSES.

Mayor's Office of
WORKFORCE
DEVELOPMENT



Economic Development

SI AAD U CODSATO

Dhammaan kuwa soo codsada oo dhan waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda si loogu tixgeliyo deeqda:

1. Waa inaad hadda ku jirtaa ganacsi cunto iibis oo kuna yaalaa Magaalada Boston
2. Waa inaad haystaa Aqoonsi libiyaha oo sax ah oo ka socda Magaalada Boston
3. Ay kuu shaqeeyaan in ka yar labaatan-ijo-shan (25) shaqaale
4. Haysataa caddeyn ah cinwaanka ganacsiga Boston ku dhex yaalo (tusaale ahaan, rukhsadda ganacsiga/shatiga/cinwaanka, biilka korantada ee ganacsiga si toos ah magaca ugu qoran, ama dukumiintiyada kale ee xafiiska guriga)
5. Ganacsiyada iyo milkiilayaasha ganacsiga waa in Dowlada Boston ayna wax ku la'hayn
6. Ganacsigu waa inuu keenaa nuqlu ka mid ah Shahaadada Ganacsiga ee ugu dambaysay
7. Ganacsiyada u shaqaysa in ka badan laba (2) shaqaale waa inay keenaan caddaynta mushahar bixinta (tusaale, bayaankii mushaharka / mushaharkii dhowaa, bayaankii bangiga, caddaynta jeeggaga dabadooda).

Arjiyada aan hammeystirneyn lama socodsiin doono.

[Halkan ka Codso](#)



Economic Development